



Lacag canshuur celin ah oo loogu talagalay shaqaalaha Washington!

Working Families Tax Credit (Cashuurta Qoyska Shaqeeya) waxay siin doontaa lacag bixinta ilaa \$1,290 sanadka cashuureedka 2024 shaqsiyaadka iyo qoysaska buuxiya shuruudaha.

Yaa u qalma soo celinta cashuurta?

Shaqsiyaadka iyo qoysaska ayaa u qalma haddii ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha soo socda:

- Ku noolaa Washington ugu yaraan 183 maalmood.
- Ugu yaraan da'doodu tahay 25 iyo ka yar 65 sano AMA leeyihiin ilmo u qalma sanadka 2024.
- Waxaa lagu xareeyay canshuur celinta federaalka 2024 Lambarka Sooshal Sekuuritiga (SSN) ama Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha Gaarka ah (ITIN).
- U-qalmitaanka cashuur celinta dakhliga ee dawladda dhexe ee 2024.
 - Booqo www.irs.gov/eitc si aad u hesho xog dheeri ah.
- Waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga (arag shaxda).


Lacag intee dhan ayaa loo celinayaa shaqsiyaadka iyo qoysaska?

Waxay ku xiran tahay tirada carruurta u qalanta iyo heerka dakhliga. Ka eeg shaxda qiyaasaha ku salaysan heerka u-qalmitaanka dakhliga 2024.

Waa maxay xadiga loo dejiyay dakhliga?

Tirada carruurta u qalanta	Codsaduhu waa inuu helaa lacag kayar tan soo socota.		Lacagta ugu badan ee la celin karo
	Kali ah	Xaas leh (isla buuxinaaya)	
0	\$18,591	\$25,511	\$325
1	\$49,084	\$56,004	\$640
2	\$55,768	\$62,688	\$965
3 <i>ama ka badan</i>	\$59,899	\$66,819	\$1,290

Hadda ka codso WFTC.wa.gov/apply.



Si aad u hesho xog dheeri ah ama aad iskugu diiwaan geliso xogaha cusub, booqo webseedkeena: WFTC.wa.gov ama wac 360-763-7300.

WFTC0001-SO 12/16/2024